# Seeska FALSAFADA

## BADA HANUUNKA IYO HALAWGA BULSHADA



W/Q:- MUXUMED FAYSAL MUXUMED

# Tumada Buugga

**Mahad-naq**

**Hordhaca Buuga**

**Afeef**

**Hibayn**

**Cutubka 1aad:-Hordhaca Falsafada**

1. Waa maxay falsafadu?..........................13
2. Waa kuma faylasuufku?.........................17
3. Taariikhda falsafada...............................20
4. Tiirarka falsafada...................................22
5. Fakarka naqdineed................................23
6. Maan-galka{Logic}...............................25
7. Muhiimada falsafada...............................29
8. Falsafadu miyay adagtahay?..................32

**Cutubka 2aad:- Maxaa loogu lumaa falsafada?**

1. Falsafadu xaqiiqda ma ina gaadhsiisaa..40
2. Xayndaabka falsafada?.......................42
3. Awooda garaadka..................................45
4. Talooyin kooban ....................................49

**Cutubka 3aad:- Doodaha ilaahay ku saaban.**

1. Astaamaha ilaahnimada…………………55
2. Miyuu jiraa ILAAH?...........................60
3. Halkuu joogaa ILAAH?.........................69
4. Muxuu inoo abuuray ?........................73
5. Xaqiiqada aduunkan……………………….81
6. Weynu noolaanaynaa weligeen…………86
7. Geba gabo…………………………………….88

# Mahad Naq

Fariin wadaheeni muxamad ahaa naxariis iyo nabad gelyo korkiisa ha ahaate waxa uu yidhi " **qofka aan dadka u mahad celin Allena uma macahad celiyo".**

Waxa aan rabaa inaan marka hore ALLE u mahad celiyo maadaama oo isagu aniga i jirsiiyay weliba sababay in fikirkani hirgalo nicmadiisa iyo galadiisa awgeedna uu dhiganahani u dhamaystirmay. Mahad aan la soo koobi karin ALLE ayaa marka hore iska leh.

Marka xigta waxa aan si gaar ah ugu mahad celinayaa saaxiibkay maxammed Cumar oo ku magac dheer "Ashraf"  oo ahaa maskaxda ka danbaysay fikirkan. Maxamed oo ah turjumaha dhiganaha dhanbaalada dhallinyarada iyo Buugga hadda soo baxaya ee dhambaalada Ramadaanta. isagana waan u mahad celinayaa Mahadsanid saxiib inbadan.

Marka xigta waxa aan u mahad naqayaa dhamaan hawl wadeenadii igala qayb qaatay soo saarida dhiganahan iyo tafatiridiisa  oo ay kamid yihiin..

**1. Cabdifataax cabdilahi mu'min**

**2. Anas cabdifaxman xasan**

**3. Maxamed cumar " Asharaf** "

Waxan sidoo kale ugu danbayntii u mahad celinayaa qofkasta oo buugga wax ku darsaday ha ugu danbeeyaan akhristayaasha iyagu wakhtigooga qaaliga ah ku darsanaya.

# Hordhac

Waxa jirta aragti lagu magacaabo aragtida 75**% ( theory of 75% percent)**. Aragtidani waxa ay sheegtaa in qofku hadii uu arko mawduuc ama qof kale oo ku cusub ay maskaxdiisu samayso qiimayn kedibna qiimayntaas ay uga soo baxdo natiiju uu ku dhiso go'aankiisa iyo aaminaadiisa tusaale ahaan : waxa macquul ah in aad aragto oo aad la kulanto qof cusub oo aanad weligaa hore u arag isla goorta aad qofka is baratan ee aad is dhaafsataan magacyadiina durba maskaxdaadu qofkan kugu cusub wey qiimaynaysaa waxa macquula inaad qofkaa ka qaadato aragti wanagsan oo uu kuula muuqdo qof wanagsan ama aad ka qaadato aragti xun oo uu kuula muuqdo qof xun. Waxa aan uga socdaa aragtida ugu horeysa ee uu qofku wax ku cusub ka qaataa waa mid maskaxdiisu ku dhagto. Waxa macquul ah inaad qof is barateen kedibna aad ka aamintay aragti qaldan balse

markii aad mudo wada socoteen ee aad is dhex gasheen aad ku tidhi hebelow ama se heblaayooy qof xun ayaan markii hore kuu haystay balse uma dhawid. Hadalkani waxa uu muujinayaa qiimayntii ay maskaxdaadu samaysay markii ugu horeysay ee ay qofkan la kulantay. Aragtidani waa midaa uu qofku boqolkiiba 75% uu ku dhiso aaminaadiisa marka uu qof cusub la kulmo.

mawduucani hadii uu yahay mid kugu cusub waxan ogsoonahay in aad aragti ka qaadan doonto ha samaato ama se xumaate aragtidaa aad ka qadan doontana laba qodob ayaa saamayn ku yeelan doona oo ah maadada laftarkeeda iyo cida kuu sharaxaysa.

Mawduucan ku saabsan seeska iyo tiirarka falsafada kuma ihi aqoonyahan ku talax tagay umana ihi macalin balse waxa jirta baahi aad u weyn oo loo qabo in la fahmo waxa ay tahay falsafadu. Waxa jira fahan qaldan oo ay

dadkeenu haystaan fahankaas oo ah mid aalaaba qalooca. Waxa aad moodaa falsafadu in ay bulshadeena agteeda ka tahay xaaraam iyada oo ay ugu wacantahay sawirada qalooca ee laga bixiyay iyo adeegsiga qaldan ee reer galbeedku maadadan u adeegsadeen. Balse waxad ogaata in ay jirto adeegsi quman iyo sawir saxan in ay diinteenu ka bixisay arrinkan ama se maadadan falsafada ah.

Falsafadu waxa ay adeegsataa garaadka halka garaadkuna yahay halka arrin ee aynu kaga gedisanayahay abuurka kale oo dhan iyada oo adeegsiga garaadka iyo su'aal is weydiintana uu Rabigeen ina farayo isaga oo inbadan kitaabkiisa ku leh " miyaydaan fakarayn" hal marna ma dhacdo in kitaabka qur'aanka ah laga soo helo kalmada ama se weedha garaad oo magac ah laakiin taas badalkeeda waxa la soo helayaa iyada oo ah fal ama se ficil ah oo muujinaysa garaadkii oo qabsanaya shaqadiisii taasi oo ah fikir iyo wax is weydiin ah.

Buug yarahan lamagaca baxay “SEESKA FALSAFADA.” waa dhigane kooban oo xanbaarsan xogaha aasaaska u ah maadada falsafada taasi oo ah maado ku dhisan garaadka aadamaha.

Buuggani waxa uu ka warbixinayaa arrimaha seeska u ah falsafada. Waxa jira buugaag badan oo ka hadlaysa aasaaska maadadan falsafada balse nasiib daro aan ku qornayn afkeena. taasi oo keeni karta in ay akhristayaal badani ka caajisan in ay ku akhriyaan afafkaa qalaad ee ay ku qoranyihiin. Aniguna ka shaqsi ahaan waxa aan dedaal u bixiyay sidii aan iskugu dayi lahaa in lahelo dhigane kooban oo ku qoran afkii hooyo lehna sharaxaado la wada fahmi karo si ay dhalinyarada maantu ama se kuwa jiilasha danbe ahi u helaan tixraacyo iyo maraajic ay ku noqdaan marka ay mawduucan falsafada ah timaado iyada oo marjacaasi ugu qoranyahay afkoodii Hooyo. Falsafada oo ah maado marka la soo hadal qaado dad badani ka didaan ayuu Buuggu xaqiiqadeeda daaha ka rogayaa.

# Afeef

Soomaalidu waxa ay tidhaahdaa af daboolani waa dahab mar kalena waxa jirta weedh caan ah oo ay carabtu leedahay taaso macno ahaan noqonaysa" marka aad Buug curiso dadka waxaad u soo bandhigtay garaadkaagii"Waxa ay murtiyahani tilmaamayaan in uu qofku ceeboo dhan ka dhawrsanyahay inta uu afkiisa iska haysto balse marka uu warbixin soo gudbiyo ay suurta gal tahay in ay wax ka raacaan. Sidaas awgeed madaama oo aanan ahayn qoraa waxa aan aad uga cudur daaranayaa xirfada qoraalkayga oo hoosaysa iyo qaab qoraalkayga oo laga yaabo in aanu idin cajabin . wixii qaladaad dhanka qoraalka ah ma dhanka xogaha ah iyo sidoo kale wixii talo guud ahba waxa aad iigu soo gudbin kartaa cinwaanadaydan.

Muxumedfaysal100@gmail.com

**+252 63 4479984**

# **Hibayn**

Buuggan waxa aan u hibaynayaa labadayda waalid hooyaday **Nimco Cabdi Axmed** iyo aabahay **Faysal Muxumed Xayd** . waxa intaas ii soo raaca dadkayga aan jecelahay ee huwada magaca guud ee **bulshada soomaaliyeed.**

# Cutubka 1aad:- Hordhaca falsafada

## maxay tahay falsafadu ?

Marka uu qofku arko wax cusub waxa uu iska weydiiyaa su`aalo badan  si uu xog badan uga helo una fahmo maadaama oo waxaasi ogaalkiisa ku cusubyahay. Marka aad manta maqasho wax cusub weydiinta ugu horeysa ee maankaaga kusoo dhacaysaa waa mida odhanaysa : waa maxay waxaasi? Waxaan filayaa oo uu maankaygu ii sheegayaa qofka uu mawduucani ku cusub yahay ee aan hore u maqlin ama se maqlay balse aan xog badan ka haynin mawduuca Buuggan in su`aasha ugu horreysa ee uu is weydiinayaa tahay waa maxay falsafadu ?

Cutubka koobaad waxa aynu kusoo qaadan doonaa hordhaca aqoonta falsafada ku saabsan waxana aynu isku deyi doonaa in sida ugu fudud uguna kooban u qaadaa-dhigno waxa ay tahay falsafadu , taariikhda ay leedahay , tiirarka ay ku taagantahay , muhiimada ay leedahay

barashadeedu iyo xogo kale oo ku saabsan gun-dhiga maadadan.

Haddii aynu sharax kooban ka bixino waxa ay tahay falsafadu waxa aynu u sharixi karnaa dhawr qaybood inaga oo hadba dhan ka eegayna, sida tan ayaana qeexitaanadeedu u dhacayaan :-

- Falsafadu waa shaqada faylasuufyada.

- Ereyga “**Falsafad**” asal ahaan waa erey Giriig ah oo ka yimid laba weedhood oo isku tagay “ **philo**” iyo “**Sophia**” oo macnahoodu noqonayo
  marka la isku daro jacaylka xikmada.

- Falsafada waxa aynu mar kale ku qeexi karnaa in ay tahay hawl laga qabto Maskaxda iyada oo laga fikirayo su`aal gaara lagana sal-gaadhayo xaqiiqada dhabta ah ee shaygaas wax la iska weydiiyay.

Marka la isku  soo geeyo qeexitaanada kala duwan ee aad qaarkood halkan ku aragtay iyo

kuwa kale ee aad qormooyin kale ku arki doontaanba waxa ay ka simanyihiin ujeedka guud iyo macnaha oo noqonaya in ay falsafadu tahay maado ku qotonta fikirka iyo garaad ka shaqaysiinta taas oo hadba laga fikirayo hal mawduuc oo go`an iyada oo kafikirka mawduucaas looga gol leeyahay in la gaadho xikmadiisa iyo xaqiiqadiisa. Tusaale: mawduuca laga fikirayo kasoo qaad in uu yahay , maxay tahay sababta ay dadku koox-koox ugu wada noolyihiin ee aanay keli keli ugu wada noolayn? Marka weydiinta noocaasi ah laga jawaabayo ee la isku dayayo in maskaxda laga shaqaysiiyo waa in ay jawaabta ugu danbaynta ah ee soo baxdaa noqotaa mid gun-gaadh ah.

Qodobada qeexitaanka falsafada aynu si gaar ah ugala soo baxaynaa waa kuwan:-

1. **Maan-shiil**:- waa maskax baadhis waana shaqada garaadku u qabto jidhka waana waxa saxda ah ee ay ku dhisantahay falsafadu taas oo ah wax is weydiin.

2. **Gun-gaadh**:- waa gaadhista halka ugu danbaysa ee xaqiiqda uu shay leeyahay. Haddii keliya falsafadu
3. Falsafadu waxay tahay wax isweydiin iyo ka jawaabis dadkoo dhami waxay wada noqon lahaayeen faylasuufyo balse waxa kala kaxeeyay dadka ayaa ah fogaan araga.
4. **Arrin go`an** :- falsafadu ma aqbasho in dhawr mawduuc oo kala gedisan hal mar laga wada fakaro maadaama oo ay arinta noocaasi ahi luminayso diirada maskaxda. Falsafadu waxa ay ogoshahay in hal mawduuc la iska weydiiyo dhawr weydiimood balse markasta hal weydiin uun laga fakaro.

Qodobadaa saddexda ah ee aan xaga sare kusoo xusay waa qodobadii ku jiray qeexitaankii aynu ka bixinay waxa ay tahay falsafadu. Waxa aan rajaynayaa in aynu hada isla garanayno waxa ay tahay falsafadu.

## Waa kuma faylasuufku?

Ka bulsho soomaali ahaan qofka barta cilmiga caafimaadka ee isla cilmigaas uu soo bartay ku shaqeeya  waxa aynu u naqaanaa (DR) oo u taagan dhaktar sidaa si lamid ah qofka faylasuufka ah ama qaadanaya magacani waa qofka bartay falsafada qaab akaadamik ah. Haddii aynu sii dhex galno waxa aynu sidoo kale magacan siin karna qofka had iyo goor xikmad raadiska ah. Mala odhan karaa aqoonyahanku waa faylasuuf? Jawaabta su`aashan waxa aynu keliya ka jawaabi karnaa marka aynu miqiyaas iyo halbeeg wax lagau cabiro u samayno qofka aynu siinayno magacan faylasuuf. Qofka sida saxda ah xaqa u leh in magacan siinaa waa qofka aqoonyahanka u ah maadadan falsafada lehna aragti. Maraka aan leeyahay waa in uu lahaada aragti cusub ama se uu aragti hore u jirtay dadka dhankale ka tusiyaa waa astaanta saxda ah ee muujinaysa in qofka astaantan leh uu yahay faylasuuf. Aragtidiisa waxa uu faylasuufku bulshadiisa ugu soo gudbin karaa dhawr qaab

oo kala ah:- qormo , Buug, suugaan , khudbad iyo sawir-farshaxameed iyo qaabab kale oo badan balse muhiimada ayaa ah in ay aragtidiisasi noqoto mid dhigaal geli karta siina waari karta.

Waxa sidoo kale jira astaamo badan oo ay leeyihiin kana simanyihiin faylasuufyadu waxaana kamid ah:-

- **Maskax furnaan**:- waa in faylasuufku aqbalo wixii lagaga saxsanaado ee loo helo cadaymo lagu qanci karo. Tanina waxa ay Meesha ka saaraysaa in uu faylasuufku diido xaqiiqo jirta oo lagaga cadaymo badanyahay.
- **Fakar naqdineed**:- waa in faylasuufku marka uu fakarayo ee uu rabo inuu weydiin ka jawaabo adeegsadaa fakarka naqdineed oo ah fakar ka fog caadifada kana heersareeya fakarka caadiga ah lehna xeerar la raaco si fakarkaa loo hirgeliyo.
- **Indheer garadnimda**:- oo ah fogaan araga faylasuufka .

- **Luuqada falsafada**:- mararka qaar wey adagtahay in aynu Af soomali ku sharaxno luuqada falsafada balse aan dhankale wax kaa tuso.

Marka uu qofku rabo inuu cabiro dareen aad u daran waxa uu u waayaa kalmado u uku cabiro sidaas si lamid ah mararka qaar falsafada waxa aad ku arki doontaa kalmado is diidan oo haddana is leh iyo qaar iska hor imanaya oo haddana is qaadanaya.waana luuqada ka dhaxaysa faylasuufyada iyo indheer garadka dadka.waxa jira astaamo badan oo ay leeyihiin balse intani waa inta ugu mudan ee ay wadaagaan ragga buuniyada ku ah falsafad.

# Taariikhda falsafada

Taariikhda falsafadu waa barashada horumarkii kala gedisanaa ee ku yimid hab-fikirkii ay ku qotontay falsafadu . markii koobaad cilmigan falsafadu waxa uu ka hano qaaday dalka Giriiga iyada oo ay ugu wacnayd ilbaxnimooyinkii iyo jiraalkoodii dheeraa ee uu Giriigu lahaa. Marka la soo hadal qaado falsafada gaar ahaan taariikhdeeda waxa la xusaa Socrates oo ahaa aabaha falsafada iyado oo mararka qaar la sheego in ay jireen dadyaw dhawr ah oo isaga ka horeeyay hadana waa midka la siiyo mudnaanta cilmigan halka dadyawgii ka horeeyay loogu yeedho ka hor Socrates **{pre-socrates}.**

Aqoontani waxa ay soo gaadhay dadyawgii islaamka ahaa waqtiga ay taariikhyahanadu ugu magac daraan casru dahabigii islaamka xilligaas oo la tilmaamo in ay ahayd xilligii uu haaruun Al-rrashiid taladas hayay islaamkuna uu lahaa maktabadii abid ugu weyneyd dunida ee lagu

magacaabi jiray **daar al xikma** ee ku taalay Baqdaad.

Aqoonyahankii muslimiintu waxa ay aqoontan falsafada ku soo kordhiyeen aragtiyo cusub oo ay diintoodu wadatay waxana ay naqdiyeen aragtiyo badan oo ay reer giriigu qabeen . waxa aqoonyahankii islaamka ahaa ee falsafada bartay aragtiyana ka imid kamid ahaa Al-Faaraabi , Imaam Al-Qasaali ,Al-Kindi iyo aqoonyahan kale oo badan.

isku soo wada duuboo aqoontan falsafadu maaha mid aadamaha noloshooda wax ku soo biirisa aan ka ahayn garasho in ay u yeeshaan waxyaabaha qaar taas oo la idhaahdaba inaad garasho u yeelato waxyaabaha qaar iyadaaba sideeda faai`do u ah. Taariikhda falsafada waxa sees u ah horumarkii ku imanayay afkaartii falsafadeed ee ay dadku qabeen oo marba marka ka danbaysa is soo taraysay.

# Tiirarka falsafada

Aqoon kasta oo la bartaa waxa ay leedahay tiirar ay waajib tahay in ay ku dhisnaataa tiirarkaas la`anteedna aanay sii jiraynin. Si guud aqoontan falsafada waxa sees iyo saldhig u ah wax is weydiin.

Aqoontan falsafadu waxa ay ku dhisantahay laba tiir oo waa wayn oo kala ah.

1. **Fakarka naqdineed**
2. **Maan-gal**

## Fakarka naqdineed {Critical thinking}

Fakarka naqdineed waxa uu qayb ka yahay noocyada fakarka gaar ahaan qaybaha ugu mudan. Si guud fakarku waa in uu qofku ka shaqaysiiyo maskaxdiisa isaga oo adeegsanaya awooda garaadka ee leh sawirashada iyo kala garashada xumaha iyo samaha. Fakar ka naqdineed waa fakarka ka madhan caadifada iyo dareenka. Waad maqashay hadalo ay kamid yihiin “ go`aan ha qaadan marka aad xanaaqsantahay” sababta sidaas laguu leeyahay: ayaa ah in aad xaaladaas ku jirto dareen keliya farriimaha ay maskaxdu soo diraysaana yihiin qaar bilaa hubsiimo ah oo keliya xaaladaa aad ku jirto ay u malaynayso in aad degenaanshiyo ku dareemi karto.

Fakarkani waa midka ugu tolmoon ee uu qofku adeegsan karo xilliyada ugu adag si uu u gaadho go`aan saxan . si uu qofku ugu fakaro qaab tolmoon waa in uu tilmamahan raacaa:-

- ✓ **Xog helid**:- arrinta aad rabto in aad ka fakarto waa in aad ka haysaa xog aad ku kala dhig-dhigi karto ogowna markasta oo

xogtaadu badato waa markasta oo sida aad u fakaraysaana korodho ama se isbadasho.

- ✓ **Kala miirid**:- xogaha aad heshay waxa ay u baahanyihiin in aad kala ogaatid ma runbaa mise waa been si aad go`aan saxan u gaadhid.
- ✓ **Taxliilin**:- waa in aad kala dhig-dhigtaa xogta oo aad fakarkaaga iyo arrintaada u heshaa cadaymo sugan.
- ✓ **Go`aan** :- mar hadii aad xogtaadi nadiifisay taxliilin iyo cadaymana u heshay waa in aad ka go`aan qaadataa.

**Tusaale :-** ka soo qaad lamaanahaagi ayaa qof war xun kaaga sheegay halkan marka aynu marayno waxa aad haysataa xog, ogowna haddii aad xogtaas lagaaga sheegay lamaanahagu ay caadifadaada kiciso oo aad isla halkaas ku go`aan qaadato in aad u fakartay qaab caadifadaysan oo uu dareen ku lamaanyahay. Balse si aad go`aan saxan u gaadho talaabada ugu horroysaa waa in ay noqotaa in aad isku daydo in aad u fakarto qaab tolmoon iskuna daydaa in aad hesho xog-dheeri ah qofka warka

xun kaaga sheegay lamaanahaagana aad xogo kale ka sii hesho.

Talaabada labaad ayaa ah in aad xogtaada badhis ku samayso oo aad hubisaa sax ahaanshaheeda qofkii warka kuu sheegayna aad eegtaa inuu yahay qof la rumaysan karo iyo in kale. Talaabada saddexaad ayaa iyaduna ah in aad hesho cadaymo sugaya warkaa lagaaga sheegay lamaanahaaga waayo maskaxdu qaabka keli ah ee ay wax ku aqbashaa waa cadaymaha sugaya xaqiiqada xogta. Marka aad intaas oo talaabo soo samayso ugu danbaynta waxa aad heli doontaa xog run ah ama se been ah oo aad is odhan karto sax maaha marka aad eegto caddaymaha iyo run ahaanshiyahooda ugu danbayna go`aan ayaad ka gaadhi doontaa. Waakaas fakarka naqdineed ee la adeegsado marka arrin falsafada la xidhiidha laga fakarayo.

## Maan-Gal {Logic}

Maan-galku waa barashada sharciyada fikirka ama sababaynta saxda ah. Haddii aynu si

faahfaahino waxa ay noqonaysaa xeer kamid ah xeerarka aqbalaada maskaxda. Waad maqashay qof odhanaya aniga waxaasi maskaxdayda magalayaan taas oo uu ula jeedo ma aqbali karto maskaxdaydu qaadashada noocaas ah taasna waxa aynu Af soomaali ahaan u naqaana maan-gad oo ah waxa aan maskaxdayda galayn.

Maan-galku xeerar ayuu isaga laf ahaantiisu sii leeyahay waana qodobka labaad ee ay falsafadu ku dhisantahay. Tiirkan labaad ee maangalnimadu waa maado keligeed meel istaagi karta oo Buugaag iyo qormooyin badan laga diyaariyay.

Tiirkan maan-galka waxa gun-dhig u ah dooda oo ah waxa uu qofku ku doodayo gaar ahaan cadaymaha uu keenayo siu u doodiisaas u xoojiyo.

Dooduhu waxa ay u kala baxayaan laba qaybood oo kala ah dooda saxan iyo dooda dunsan.

**Dooda saxan:-** waa mida uu qofku keenayo cadaymo uu rabo in u uku sugo runahaanshiyaha waxa uu ku doodayo halka

cadaymahaa uu keensanayaa ay sax iyo run wada yihiin

**Dooda dunsan**:- doodani waa cagsiga dooda saxan . dooda dunsani waa dooda aan lahayn cadaymo saxn oo run ah.

Akhriste mid og-soonow dooda oo aynu hore ugu soo qeexnay aaminsanaanta iyo sida uu qofku ka qabo arin in ay u baahantahay cadayn iyo in cadaymahaasi run noqdaan waana labada qodob ee lagu kala saari karo dooda tan guulaysanaysa. Doodahan iyo cadaymahooda waxa aasaas u ah cilmiga maan-gal ka oo hadii cadaymuhu noqon waayayaan qaar maan-gal ah oo anay maskaxdu aqbalayn doodaasi waxa ay noqonaysa mid daciif ah.

Bal kawaran haddii labada doodoo doo isku lid ahi Meesha soo galaan mid kastaana wato cadaymo run ah teebaa guulaysanaysa? Dooduhu marka ay yimaadaan fagaaraha dooda ee dadkii kala watay soo bandhigaan waxa ay u kala baxaan laba qaybood sida caadiga ah ee lawada yaqaano oo kala ah: **dooda guulaysatay** iyo **dooda daciiftay.** Markasta waxa

guulaysanaysa dooda laga helo shuruudahan hoos ku xusan:-

- **Caddaymo**:- doodba dooda ay ka cadaymo badan tahay wey shiiqisaa.
- **Saxsanaan**:- doodba dooda ay ka cadaymo saxsanaan badan tahay wey burisaa.
- **Aftahamo** :- qofka doodaya ayay ku xidhantahay sida uu doodiisa u dhigo waxa macquula in isaga oo laga gar leeyahay haddana uu guulaysto doodiisana difaaco ta dhiggiisana weerar ba`an ku qaado.

Si kooban haddii aynu iskugu soo duubno aqoonta maangalnimada ee tiirka u ah falsafadu waa aqoon balaadhan waxana ay ka turjumtaa in waxa aad maqlayso ama se aad akhrinaysaa noqdaan qaar garaadkaagu aqbali karo. Maangalinimadu waxa ay sidoo kale aasaas u tahay dooda oo ah luuqad-qoraalka falsafada.

## Muhiimada falsafada

Dunidan aynu ku noolnahay aqoon kasta oo la bartaa sida caadiga ah waxa ay leedahay muhiimad gooni ah dadka bartana waxa ay aqoontaa ay barteen u adeegsadaan sidii ay noloshoodana wax uga badali lahaayeen.

Aqoontan falsafadu waxa ay kaga geddisantahay aqoomaha kale sida xisaabta iyo saynisaka ayaa ah in aanay lahayn wax faai`do ah oo dadka noloshooda wax kusoo kordhin karta. Waxa macquula in aad weedhahaygan la yaabto! oo aad is weydiinayso aqoontan sidan oo dhan loo buun buuninayo ee haddana aan waxtarka lahayn maxay ahayd? Maxa se hadda laga baranayaa? Hadalkayga waxaan uga jeedaaa sida aragtiyaha sayniska ama xisaabta ah loogu rogi karo fal si nolosha banii aadamka u intifaacsato si lamid ah umashaqayso aqoontan falsafadu. Keliyaha falsafadu waxa ay ku eegatahy afkaar aan soo dhaafin maskaxda iyo afka. Dadka qaar ayaa ku dooda in wax la

ogaadaa in ay faai`do tahay ogaanshiyahaasna ay ka dhalanayso in wixii la ogaaday siyaabo kala duwan loo adeegsado. Aqoonta faai`dadeedana aan loo shardiyi Karin in ficil loo rogi karo. Muhiimada iyo waxtarka keli ah ee ay falsafadu leedahay ayaana taas ah.

Aqoontan falsafadu ma jirto wax ay bulshada u soo kordhisaa sida sayniska loogama faai`daysan karo noloshana uguma dabaqi karno iyada oo ay ugu wacan tahy in ay falsafaduba tahay hawl ku gaar ah afka iyo maanka sidii aynu hore usoo xusnay. Balse waxa jira sababo badan oo aynu u baran karo waxana kamid ah.

1. Falsafadu waxa ay tahay kansho (fursad) kor u qaadi kara hab-fikirka qofka.
2. Xirfada ka shaqaysiinta garaadku waxa ay qofka barta maadadan u saamixi kartaa in uu ku kasbado shaqooyin badan oo laga shaqaysiiyo garaadka kuwaas oo ay shaqooyin ku heli karaan ama se xirfadoodaa shaqo kor ugu qaadi karaan waxaana shaqooyinkaas kamid ah: law,

computer programming, management consultancy, the civil service, and journalism.

3. Markale waxa aynu falsafada u baran karnaa raaxo ahaan. Waxa jira dad ay u tahay madadaalo ama wax ay ku raaxaystaan oo ay naftoodu degenaan iyo raaxo ku dareento.

## Falsafadu miyay adagtahay?

Si guud ahaaneed waxa jira aqoomo aad u tiro badan kuwaas oo kala geddisan kuna kala qoran afaf kala duwan ayna aasaaseen aqoonyahano kala diimo iyo qoomiyado duwan balse ilaa hada majirto aqoon dadkoo dhami iskuwada raacsanyihiin in ay adag tahay. Waxa suurto gal ah in ay jirto maado adiga gaar ahaantaada kugu adagi haddana waxa la helayaa qof kale oo ay maadadaasi u fududahay taasina waxa ay Meesha ka saaraysa mabda`a ah in ay jirto maado adag balse adkaanshiyaha maadadu ay ku xidhantahay fahamka hore iyo cabbiraada koobaad ee ay maskaxdaadu ka qaadato maadadaas .

Aqoontan falsafadu ma odhan karo wey adagtahay oo waxa jira dad badan oo ay u fududahay mana odhan karno wey fududahay

oo waxa jira dad badan oo ay ku adag tahay necebna akhrinteeda iyo fahankeeda. Balse waxa jira qodobo kadhiga mid adag in hore loo fahmo qodobadaasna waxa kamid **luuqadda** oo aynu hore u soo sheegnay in maado kastaa leedahay luuqad u gaar ah halka ay falsafaduna ka sii xeel-dheer tahay maadadasama oo qofka faylasuufka ahi rabo fahan iyo dareen aan bulshadu hore u hayn in uu soo gudbiyo halkaasna mararka qaar weedho fahamka noocaasi ah xambaara loo waayi karo.

Waxa sidoo kale falsafada sii adkeeya iyada oo ay ugu wacantahay in ay had iyo goor ka hadasho wax caqliga aadamuhu hore uga caajiso kuna saabsan jiraal .

## Cutubka 2aad:- Maxaa loogu lumaa falsafada?

Badi dadyawga islaamka ah gaar ahaan ummadeena soomaalida waxa waayadii danbe ee ay dunidu noqotay isku furanka kusoo furmay mawjado badan oo afkaar ah halka ay da`yartii soomaliduna dhex muquuratay badwayntaa kusoo faruurantay.

Afkaaraha noocaasi ahi waxa ay la jaanqaadi kara uun qof garanaya awooda codka garaadka togan oo aan uga jeedo qof laba arrimood isku darsaday oo kala ah:- aqoon dhanka maangalka ah iyo aqoonta doodaha iyo shayga labaad oo ah isku xidhka aaminsanaanta{**Diinta**} iyo dooda oo ah tan ugu muhiimsan oo noqonaysa in uu qofku isku xidhi karo daliiladii qur`aanka iyo xadiiska lahaa iyo qodobka laga doodayo isaga oo maan-galkiina adeegsanaya.

Wey adkayd wakhtigii hore in la helo aqoonta maan-gal ka madaama oo nidaamka waxbarasho ee dugsi iyo madarasadba leh laga

waayay aqoonta noocaasi ah. Maadaama oo ay falsafadu ku tiirsantahay waxa loo yaqaano maan-galka wey fududahay qofka diintiisa ka shakiya ee awooda saaraya falsafada in la qanciyo waa haddii uu helo aqoonyahan muslim soomaali ah oo garanaya cilmiga maangalka balse dhibaatada jirta ayaa ahayd in fahanka soomaalidu uu aad u hooseeyay taasina ay dhalisay ciddii wax shaki ahi uu diinta ka galo in la idhaa u duceeya waxbaa sitee isaga oo aan looga jawaabayn su`aalaha uu wato.

Nasiib wanaag waayadii danbe waxa soo baxay aqoonyahano culuumta falsafada si waafiya u garanaya diintana si toolmoon u garanaya kuwaas oo buriyay doodihii ay wateen kuwa raba in ay diinta u sameeyaan ceebaha iyo sidoo kaleba dhallinyaradii diintooda shubahada ama se shakiga lagaga furay.

Balse ilaa hadda dhibaatada ina sii haysta ee jirta ayaa ah in ilaa iyo hadda aanay aqoonyahanadeena Diinta ee culimada lagu magacaaba iyo barayaasha kale ee cilmiga

maadiga ahiba aanay labadoodu la jaanqaadin casrigan danbe gaar ahaan sida aqoonta loo gudbiyo.

Waxa jirtay xilli sida farriimaha iyo aqoonta la iskugu gudbiyaa ahayd kaliya in qofka inta uu macallin soo hor fadhiisto wax loo sheego deedna weydiimaha uu soo celiyana laga jawaabo sidaasna uu ku kaco balse hahda amintan aynu joognaa maadaama oo uu yahay mid aad tiknoolajiyadu u kobacday  duniduna tahay qol yar aanu nidaamka noocaasi ahi ka shaqaynkarin waana dhaliisha dul hoganaysa wadaadada diinta baraya da`yarta iyo barayaasha kale ee maadiga dhigaya.

Samankan waxa badan caajiska marba hadii uu sheekhu ama se macallinku uu yahay ka casharka bixinaya hadhawna su`aasha ka jawaabaya ardaygu manoqon karo arday waxbaranaya wayo waxa ay ahayd in uu macallinku marka hore mawduuca uu casharku ku saabsanyahay uu diro kedibna ardaydu ay baadhitaan galaan ardaygu marka uu dedaal soo bixiyo ee uu mawduucii soo baadho isaga oo

Buugaag iyo kutubo kala wada gedisan soo akhrinayay uu la imaado goobtii waxbarashada kedibna uu soo jeediyo macallinka iyo ardayduna ay weydiimo ka furaan soo jeedintiisa ardayguna uu weydiimahaa jawaabo lagu qanci karo ka furo. Ogowna ardaygan haddaanu marka hore lagu soo tababarin in uu sida noocaasi ah usoo tababarto loona ogolaado inuu qaladaad galo dibna laga saxo hadhaw wey ku adkaanaysaa inuu dad qancin karo oo uu wax soo jeedin karo.

Qaabka sidaas ah ee wax loo baranayo iyada oo weliba aanay Meesha ka maqnayn adeegsiga tiknoolajiyadu waa qaab ka faai`do badan kan hada ardayda diinta iyo maadiga kala goonida u dhigataa ay wax u barato nidaamkaas horena cida wax baranaysay waa macallinka madaama oo uu isagu yahay kan wax walba qabanaya ardaydana waxa uu ku mudayaa irbad suuxiso ah oo garaadkooda u sheegaysa in wixii ay qabanlahaayeenba loo qabtay oo aanay jirin sabab ay waxu qabtaanba.

Ujeedada mawduuceena aynu usoo noqono nidaamka noocaasi ah iyo aqoontaa inaga dhiman waata sababatay in dadyaw badani lumaan ama se diintooda laga shaki geliyo.

Had iyo goor mararka mawduucan lasoo hadal qaado ee ay culimadu ka hadlayaan da`yarta diinta ka sii durkaysa waxa ay talo ahaan kusoo jeediyaan in uu qofku barto diinta waayo iyadaa ah badbaado. Maaha talo taban ee waa mid togan balse waxa aad moodaa in aan qodobkaa barashada diinta ah oo keli ahi aanu daawo buuxda u noqon Karin nabarka da`yarteena ku yaala sababtoo ah qofka kawaran haddii diintii uu baranasyay laftarkeedba laga shaki geliyo muxuu samayn? Miyuu ka carari? Sida ay dad badani ku taliyaan. Dabcan waa maya tanina waa qodob horsed u ah inuu qofku lumo.

Imaamu qasaali ayaa laga hayay weedho ahaa **" Inyar oo aad falsafada ka barataa waxay ku dhaxalsiin kartaa gaalnimo halka barashada falsafada si gun dheer u barataa ay ku dhaxalsiinayso muslinimo dhab ah".**

Ma taqaana xilliga cadawgaaga sida saxda ah la iskaga celiyo? Waa marka aad garanayso halka uu weerarka kaaga soo qaadayo iyo nooca hubka uu haysto iyo sida ay ciidamadiisu u tababaranyihiin iyo tiradooda. Sidaas si lamid ah qofku waxa uu shakiga ka badbaadi karaa keliya marka uu cilmigii diintiisa ahayd garanayo hubabkii lagu difaacayayna haysto. Waxa macquula in aad maqasho kuwo ku leh diintu iyadaaba hub ah. Waa sax balse kawarn hadii uu mulxid aan alle iyo nebi aqoon kugula dodo diintaada? Miyaad iska dayn doodiisa? Maya maaha inaad doodiisa iska dayso. Hadii aadan diinta saxnimadeeda qof ku qancin Karin ma ilaaliye iyo waardiye ayaad diinta u tahay? Hubabka diinta lagu ilaaliya wey badanyihiin waxa keliya ee aadamuhu kawada simayihiina waa garaadka iyo cilmiga maangalnimada kaas oo ay falsafaduna ku dhisantahay.

Isku soo wada koob oo qaar kamid ah sababaha ay dhalin badan diinta uga sii durkayaan halka qaar ay kaba baxeen ayaa ha nidaamka waxbarashada oo dadka loo soo diyaariyaay qaar aan fakarkooda cabiri Karin iyo aqoomo

badan oo inaga maqan lana fahansanayn muhiimadooda.

## Falsafadu xaqiiqada ma ina gaadhsiin kartaa?

Weydiintani waa mid muhiim ah oo u baahan in si qoto dheer looga jawaabo waayo waxa jira da`yar badan oo ku qanasan in ay falsafadu tahay mid marwalba xaqiiqada ina gaadhsiin karta.

Falsafadu waxa ay adeegsato ee had iyo goor shaqadeeda u qabtaa waa garaadka qofka. Aynu weydiin kooban soo dhex gelino mawduuceena. Garaadka qofku xad ma leeyahay mise waa bilaa xad? Dabcan garaadkeenu xad ayuu leeyahay taasna waxa sabab u ah in aanu garaadkeenu gaadhi Karin waxa loo yaqaana dabeecadda kedib **{metaphysics}** garaadkeenu ma sawiran karo waxa adduun keena banaanka ah si kasta oo ay aqoontiisu u horumartana ma gaadhi karo taasina waxa ay muujinaysa in uu garaadkiisu xadidanyahay. Madaama oo uu garaadkii ay

falsafadu adeegsanayaysay uu xadidanyahay waxa qasab ah inay falsafaduna xad leedahay oo aan had iyo goor la odhan Karin waxa ay ina gaadhsiinaysaa xaqiiqada.

Waxa aynu cutubkii koobaad kusoo xusnay in ay falsafadu tahay maado keliya oo ku eeg afka iyo maskaxda ku ee kaanshaha noocaasi ah ee aan falsafadii u badalayn mid la isla arki karo oo keliya aragti ah ayaa iyaduna ina tusinaysa in aragtidu marna saxsanaanta asiibi karto marna qaladka. Sida aynu cutubyada soo socda ku arki doonno waxa aynu arki doona aragtiyo badan oo ay faylasuufyadii Giriigu aaminsanayeen oo aqoonta sayniska ah ee cusubi beenisay taasina waxa ay markale daliil iyo caddayn sugan u tahay in aqoonta falsafada 100% la siin Karin kalsoonida ah in ay saxsanaanta ina gaadhsiinkarto marwalba.

# Xayndaabka falsafada

Mawduucan hadda aad akhrinayso mawduucii ka horreeyay waxa aynu ku soo xusnay in ay falsafadu badanka tibaaxi Karin xaqiiqada maadaama oo ay isticmaasho garaadka bani aadamka.

Mawduucana waxa aynu kaga faaloon doonaa xayndaabka xadeeya awooda falsafada balse ka hor inta aynaan mawduuca si gudo balaadhan u wada galin aan ka soo horeysiiyo tusaale inaga wada dhigaya qaar sii wada fahma mawduuca iyo waxa uu ka hadlayo.

Qolka aad habeenkii seexato waxa ku xidhan laambad kuu saamaxda in aad iftiinsato si aad wax ugu aragto. Laambadaa qolkaaga ku xidhan waxa ay ku filantahay qolkaaga oo kali ah. bal waxa aad suuraysataa hadii qolkaaga iyo laba qol oo kale la isku daro. Dabcan saddex qol oo la

isku daray waxa ay yeelanayaan baaxad weyn marka aynu halkan marayno macquul miyay tahay in aynu u baahano laambadii halka qol I finaysay? Dabcan waa maya. Sababtuna waa in laambadeenu ay awood leedahay awoodeedaasina ay meel keli ah ku xadidantahay. Tusaale ahaan waxa lamid ah garaadka oo ah waxa ay adeegsato falsafadu iyo aqoonta ay miciinka bido ee maan-galka lagu magacaabo oo ah qaar xadidan awoodooduna ay meel ku eegtahay.

Waxa kale oo falsafada xadida waxa loo yaqaano **{Meta-physics}** oo ah waxa dabeecada ka dambaya. Tusaale ahaan haddii uu qofku ka fakaro waxyaabo ilaahay ku saabsan iyo maal`igtiisa iyo wax kasta oo adduunkeena ka baxsan suurto gal maaha inuu qofku ka sal-gaadho iyada oo ay ugu wacantahay garaadkiisa xadidan.

Marar badan waxa macquula in aad aragto faylasuufyo waxa keli ah ee ay ku tilmaamayaan in uu jiro uga cabir qaadanaya dareemada shanta ah ee sida: araga, dhadhanka, urta,

taabashada iyo maqalka. Dareemadan idil ahaantoodu marara badan xaqiiqada ma tilmaamaan.

Isku soo wada kooboo falsafadu maaha mid daba furan ee waa mid xadidan oo aan had iyo goor xaqiiqada looga dab-qaadan Karin. Taasna waxa ugu wacan iyada oo ay falsafadau tahay mid aragti ah halka aragtiyuhuna ay run iyo beenba noqon karaan.

# Awoodaha garaadka

Waa maxay garaadku? ma isku midbaa garaadka iyo maskaxdu? Bani aadamku maxay tahay waxa uu noolayaasha kale oo dhan kaga gedisan yahay?

Sida caadiga ah waxa jira qaladaad badan oo ku dhisan aragtiyo kuwaas oo badi aynu soomali ahaan qabno oo aynu aaminay. Hadaba aynu si yar oo fudud marka hore u kala saarno waxa ay kala yihiin garaadka iyo maskaxdu.

Maskaxdu waa aalada ku jirta madaxa bani aadamka iyo xayawaanka. Hadii labadoodaba madaxyadooda la qalo waxa laga soo saari karaa aalad la yidhaa (Maskax) taasina waxa ay cadayn u tahay in aadamaha iyo xayawaanku ay ka simanyihiin waxa maskaxda la yidhaa.

Garaadku waa awooda ay maskaxdu ku shaqayso. haddii aad aragto qof waalan waxa badi aynu dhahnaa qofkaa miyirkiisi ma joogo

ama caqligii ayuu Alle ka qaaday inaga oo caqliga uga jeedna garaadka maadaama oo kalmada caqli ay tahay weedh carabi ah macnaheeduna noqonayo Garaad.

Qofka caadiga ah iyo kan waalan waxa ay wadaagaan aalada maskaxda waxa ay se ku kala gedisan yihiin garaadka.

Xayawaanku ma leeyihiin garaad? Dabcan inta aynaan ka jawaabin weydiintan aynu si kooban u sheegno shaqooyinka uu qabto garaadku. Garaadku waa tamarta ama se gaaska ay maskaxdu ku shaqayso. Waxana uu qaabilsanyahay kala garashada saxa iyo qaladka, awooda sawirashada khiyaaliga, go`aan qaadashada iyo qorshaynta I.W.M.

Awoodahan ay kamidka yihiin sawirashadu aynu si kooban uga hadalno. Qofka bani aadamka ahi waxa uu awoodaa in uu sawirto xaalad soo dhaaftay oo uu xasuuso galo halka uu mararka qaar odorasi karo wax aan dhicin oo uu sii sawiran karo. Hadaba aynu ka jawaabno weydiinteenii ahayd xayawaanku garasho maleeyihiin? Haa wey leeyihiin garasho. Laakiin

garashadooduu ma gaadhsiisana garashada aadamaha. Waxa aan uga jeedaa xayawaanku wey yaqiiniin waxa u xun garashadooduna waxa ay ku xadidantahay wax cunis iyo galmo samee oo keli ah. Balse ma laha awoodaha garaadka aadamuhu leeyahay oo kale aa ay kamidka yihiin sawirashadu.

Waxa aan rajaynayaa in aynu hada kala saari karno waxa maskax iyo garaad ay ku kala gedisanyihiin. Markana waxa aan rabaa in aan weydiin kale soo celiyo taasi oo odhanaysa wax xidhiidh ahi ma ka dhaxeeyaa maskaxda iyo garaadka?

Dabcan waxa aynu kaga jawaabi karnaa “Haa.” wey ka dhaxeeyaan. Si aynu u wada fahano aynu tusaale yar oo kooban soo qaadano. lambadu waa qalab ama se aalad la taaban karo oo aynu manafacaadsano waxa ay soo saartaana waa tamar iftiin ah oo aan la taaban Karin.

Haddii ay lambada wax soo gaadhaan iftiinkeedana wax baa soo gaadhaya sidaas si lamid ah haddii qofka ay maskaxda wax kasoo

gaadhaan waxa macquul ah in garaadkiisuna uu wax noqdo.

Maskaxdeena iyo garaadkeenu waxa ay leeyihiin awoodo fara badan oo ay kamid yihiin: awooda sababaynta, awooda khiyaali sawirashada iyo awoodo kale oo badan. Sidii aynu hore ku soo sheegnay awood kasta oo ay maskaaxdu leedahay maaha mid dabo furan keliya waa mid meel gaar ah ku xadidan.

Waxa keli ah ee uu **ALLE** noolayaasha kale oo dhan inaga gediyay cibaadadiisana inagugu kallifay kuna noqonay mukallafiin iyo qaar la kallifay ayaa ah in aynu awooda garaadka iyo kala garashada leenahay.

# Talooyin kooban

Waxa aan rabaa in aan dhawr talooyin ah ku soo gudbiyo gunaanadka cutubkan labaad kuwaas oo saldhig u noqon doona cutubyada soo socda iyo wixii aynu kala baxnay labadii cutub ee hore waxana ay u dhacayaan sida tan:

- Garaadku ma noqon karo il (Masdar) mar walba xaqiiqada lagu ogaan karo. Xaqiiqadu waa in garaadku aqbalo jiritaanka shay. In ay nolol danbe jirto marnaba garaadka aadamuhu ma sugi karo sidaas oo ay tahay garaadka had iyo gooraale iskuma halayn karno.

- Garaadka oo loo geeyay Diinta xaqiiqada ah oo wada farriimo aan garaadka aadamuhu sawiran Karin ayaa mudan in la isku halleeyo. keli garaadku xal ma keeni karo haddii Diinta xaqiiqada ahna lkeligeed la qaato oo garaadka la xidho iyadna xal ma keeni karto lakiin isku ladhkoodu awood ayuu abuurayaa.

❖ Ogow mar walba falsafadu in aanay macno badan oo aan dhaafsiisanayn garasho in aanay bulshada usoo kordhin madaama oo ay sidaa tahay ha isku mashquulin ee wixii kaa anfaca ka qaado isku halayn buuxdana ha siinin.

❖ Ha Durkin oo ha fogaynin qofka Diintiisa shaki ka galo. Haddiiba aad aragto qof su`aalo ka keenayaya Diinta isku day in aad qanciso adiga oo ogaanaya qofkani ma waxa uu xooga saarayaa Diinta mise garaadka hadba tii uu saaro xooga ku qanci. Balse ha odhan "gaal ayaad tahaye I ga tag sida ay dad badani sameeyaan."

❖ Isku day inaad barato culuumta Diinta adiga oo aan ka tagayn maan-galka oo iyadana baranaya si aad u fahanto Diintaada.

- Diinta dhaxal ayaynu u helnay ha iska haysanin uun ee baro garana waxa waajibaadku inoogu dul dhacayaan.

- Ogow xaqiiqada oo dhan in la ogaanayo kedib dhimashada qofkana waxa werwerka ku hayaa ay tahay in uu qasaaro sidaa darteedna ay waajib ku tahay in uu raadiyo wadadad saxda ah. saxsanaanta wadadaasna kedib dhimashada ayuun baa la ogaanayaa.

# Cutubka 3aad:- Doodaha Ilaahay ku saabsan.

Cutubkan oo ah gunaadka Buuggan waxa aynu wax yar oo kooban ku soo qaadan doona doodaha iyo qaababka ay u dhacaan. Badi falsafadu waxa ay weydiimo gelisaa waxyaabaha ku saabsan jiraalka sida mawduucan uu ka hadlayo cutubkani oo ah jiritaanka ilaahay.

Ka muslim-soomaali ahaan waxa ay inoola muuqataa wax qaldan oo qalooca in waydiin la geliyo ilaahay ma jiraa mise ma jiro? sababta ugu weyn ee taas keenaysaana waa in dhamaan dadka soomaaliyeed wada yihiin muslimiin aaminsan jiraalka ilaahay gaar ahaan jiraalka hal ilaah. Maadaama oo aanay inagu dhex noolayn umado kale oo diimo kala gaddisan aaminsan oo ay ummada soomaaliyeed hal Diin wada haysato ayaa la odhan karaa waa sabab kale oo

mawduucan qoraalkiisa iyo soo hadal qaadistiisa ka dhigaysa mid aad loo jidh diido.

Umada soo maalidu Diinta waxa ay ku heshay dhaxal marka aan sidaas leeyahay waxa aan uga jeedaa uma soo dagaalamin mana soo difaacin keliya nidaam nabadgelyo ayay ku hanteen diintan. Jiil kasta oo soo kacaamaana waxa uu aaminaada iyo Diinta dhaxal ahaan uga helaa waalidkii si lamid ah sida dhaqaalaha oo kale. Madaama oo uu dhaxal ahan u helay oo aanay jirin wax uu tabayaa waa sabab kale oo ka dhigaysa mawduucan mid xaaraam ku ag ah soomalida ag tooda.

Balse u jeedka aan aniga ahaan mawduucan u qorayo ayaa ah in ay muhiim tahay in qofkastaa iska saari karo dawo sax ahna u heli karo xanuunka mar marka qaar quluubta soo booqda ee shakiga lagu magacaabo.

Diinteena kama nihin waardiyayaal mana aha in aynu keliya Soono oo Salaadno ee waxa waajib inagu wada ah dhamaanteen in aynu aqoonta aynu hayno isku biirino dhaxal Ahaana uga tagno faca inaga danbeeya waayo waxa macquula in inaga ahaan aynu sabankan aynu noolnahay u aragno mid dhibaato badan balse waxaad sawirataa kuwa adiga kaa danbeeya wakhtigoodu tolow siduu noqon doonaa?

Weydiintan jawaab teedu keliya uma baahna in aynu afka kaga jawaabno ee waa jawaab inooga baahan in loo rogo mid ficil ah lana sameeyo dhaxal reeb aad u weyn si ay inoogu badbaadaan faca danbe inaguna aynu u noqono kuwii uu gacantooda iyo garaadkooda ugu hiiliyay Diintan.

## Astaamaha ilaahnimada

Waa kuma ilaahay? isagu ma leeyahay qeexitaan? Isaga mala garan karaa? Maxay yihiin astaamaha uu ilaahay leeyahay?

Hadii aynu weydiinta koobaad ka jawaabno oo ah waa kuma ilaahay waxa aynu ka bixin karnaa qeexitaan aad u kooban. Aduunka sida caadada iyo caadiga ka ahba wax kastaa waxa ay leeyihiin xuquuq {copy right} xuquuqda aan ka hadlayaa waa mid lahaanshiyaha ah. Tusaale ahaan mobile ka aad gacanta ku sidato shirkad ayaa leh oo sumadeedu ku taala iyada weeyaan cida iska leh xuquuqda lahaanshiyaha samaynta mobile ka aad sidato.

Waxa aan uga socdaa ilaahay waa sameeyahay iyo maamulaha kawnkan aynu ku noolnahay ee ka kooban: tamarta, muga, cir jiidhayaasha, meerayaasha, qoraxda, dayaxa iyo kunka shay

ee ku jira inta la ogyahay iyo inta aan la ogaynba.

Ilaaha aynu soo sheegnay ee aynu ku tilmaamnay in uu yahay midka iska leh xuquuqda lahaanshiyaha adduunkan ee ah sameeyaha iyo maamulaha kawnkan waala baran karaa. Balse lama wada baran karo. Waala barankaraa oo xogo kooban waalaga heli karaa Balse macquul maahan in lawada bartaa waayo garaadkeenu hadii uu xogaha ilahay ku saabsan oo dhan mawada qaadi karo. Xaga danbe ayaynu sifaadkiisa iyo tilmaamihiisa ku eegi doonaaye ilaahay waa la koobaan {infinity} waana astaanta keli ah ee aan lala wadaagi Karin ilaahay.

Ilaahay waxa uu leeyahay astaamo aad iyo aad u badan kuwa ku xusan maqaalada iyo dhiganayaashuna waa qaar garaadkeenu garan karo. Balse waxa jiri kara astaamo badan oo uu ilaahay la gaar yahay lana ogaan ilaa iyo hadda maadaama oo xogaha ilaahay ku saabsani qaab keli ah inagu soo gaadhaan qaabkaas oo ah in uu ilaahay addoon adoomadiisa kamid ah u soo

waxyoodo waxna u soo sheego adoomadaasina ay leeyihiin waqti nololeedyo u dhigma kuwa addoomaha kale.

Waxa jiraysa qaacido aynu ku dhisayno marka aynu sheegayno astaamaha ilaahay, qaacidadaas oo ah astaamaha ilaahay yeelanayaa waa qaar keliya isaga gooni u ah marka aan sidaas leeyahay macnaheedu waxa weeyaan abuurkiisu lama wadaagi karaan. waa macquul in ilaahay astaamo uu leeyahay magacyadooda astaamo lamid ah oo kale abuurkiisu yeeshaan laakiin taasi kama dhigna in ay isku astaamo yihiin keliya magaca guud ayuun bay wadaagaan.

Astaamaha ilaahay waxa kamid ah:

**Koobnaan la`anta** {**infinity**} ilaahay awoodihiisa iyo cilmigiisu waa qaar aan lahayn wax xadida ama se meel ay ku xadidmaan. Hadii aynu dhahno awooda ilaahay wuu leeyahay laakiin wey xadidantahay waxa uu ilaahay lamid noqonayaa makhluuqaadka uu isagu abuuray oo awoodoodu meel cayiman ku eegtahay.

- ✓ **Abadi** {**eternity**} ilaahay waa abadi ma jirto meel ay noloshiisu kasoo bilaabantay ama se meel ay ku dhamaan doontaa. Haddii sida caksiga ah loo dhigo waaxa muuqanaysa in sifada aynu ilaahay ku soo sheegnay mida lidka ku ah ay abuurku leeyihiin sida aadamuhu.
- ✓ **Awood badane** {**Omnipotence**} ilaahay waxa uu leeyahay awoodo aan tiro koob iyo xadidaad lahayn. Waana sameeyaha waxa uu doono.
- ✓ **Aqoon badane** {**Omniscience**} ilaahay waa mid aqoon badan waana midka og wax walba halka aqoontiisu aanay lahayn wax xadidaad ah.
- ✓ **Ma doorsoome** {**Immutability**} ilaahay isma badbadalo mana doorsoomo. sida caadiga ahna astaanta ama se sifada is bedbedelka waxa iska leh abuurka uu ilaahay diyaariyay.
- ✓ **ma cawde** {**impassibility**} ilaahay ma cawdo mana lahan astaanta la qabatinka xanuunka.

Astaamaha uu ilaahay leeyahay maaha qaar aynu soo koobi karno aad iyo aad ayay u badanyihiin balse u jeedkaygu waxa uu ahaa marka aynu gudo galno doodaha ku saabsan jiritaanka ilaahay in ay astaamahani inaga saacidaan doodeena sida aynu xaga danbe ku arki doono.

Waxa jira dodo aad u badan oo ay qabaan dadka aaminsan inuu jiri ilaah kaasi oo abuuray kawnkan iyo dunidan aynu ku noolnahay sidoo kale waxa jira dodo ay qabaan dadka aaminsan in aanu ilaahay jirin. waxaan caqligaaga u dhaafaya kala saaridda doodahaahs iyo midda saxan.

# Ilaahay miyuu jiraa?

Weydiintani waa mid bilawgii aadamaha taagnayd. Waana wax dabiici ah in qofku is weydiiyo yaa adiga ku abuuray? Ujeedada se laguu abuuray maxay tahay? Halkee ayaad asalkaagi ka timid?  Qofku in uu si gaar ah isku weydiiyo yaa adiga ku abuuray waa weydiin qofka ku qasbaysa inuu raadiyo cidii isaga jirsiisay keentayna dunidan iyada oo sababta uu qofku raadintaa iyo baadi goobkaa u galayaa tahay maadaama oo aanu ogayn mustaqbalkiisa danbe marka uu dhinto halka uu ku danbayn doono. Tani waa cabsida qofka ku qasbaysa inuu waxbadan oo jiraalkiisa ku saabsan iska weydiiyo jawaabta saxana raadsho.

Waxa jira doodo badan oo ka taagnaa arrintan ku saabsan jiritaanka ilaahay tan iyo bilawgii dunida. Baalasha soo socda ee Buugga waxa aynu kusoo qaadan doonaa doodaha ay qabaan dadka aaminsan jiritaanka ilaahay iyo sidoo kale doodaha ay qabaan kuwa diidan jiritaanka ilaahay. Waxa sidoo kale xusid mudan in ay doodaha ku lifaaqi doono burintii lagu

sameeyay. Ugu danbayna garaadkaaga ayaan uga tagayaa in uu doorto dooda uu taageerayo.

Waayo doodahan mida saxani waa mid had iyo goor u cad sida ay caanuhu u cad yihiin hadii uu garaadkaagu diidayo saxsanaantooda ma sheegin.

## **Dooda jiraalka {cosmic argument}**

Inta aynaan u gudo gelin doodaha waxa aan rabaa in aad hal qodob niyada ku hayso. Halkaas qodob oo ah wax kasta waxa ay leeyihiin qaab qoraal dooda marka la qorayana waxa ay leedahay qaab loo qoro. Doodu waxa ay ka koobantahay wax la yidhaahdo hordhac iyo gun-gaadh ama se natiijo. Dooda oo aynu kusoo tilmaamnay waxa uu qof aaminsanayahay ama se fikirka uu arrin ka haystaa waxa ay saxsanaanta natiijadeedu ku xidhantahay saxsanaanta hordhaceeda taas oo ka dhigan

haddii hordhaca doodaadu qaldanaado waxa qaldamaya natiijadaada. Tusaale hadii la yidhaa 1+1= 4 waxa aad halkaa ka dareemaysaa in natiijada marka 1+1 ay tahay 2. Laakiin si ay natiijadeenu u noqoto 4 ay tahay in aynu saxno hordhaceena oo ah waxa calaamada isku geynta ka horreeya.

Qodobka aan rabo in aad niyada ku haysaa waa midkaas. si dooda loo buriyo waxa la weeraraa ama se la isku dayaa in la buriyo hordhaceeda ee maahan natiijadeeda.

Doodani waa mid kamid ah doodaha ay qabaan kuna doodaan dadka aaminsan jiritaanka ilaahay. Doodani waxa ay ka koobantahay labba [2] hordhac iyo hal natiijo waxana ay u qorantahay sida tan:

1. Wax kasta oo dhaqaaqa waxa jirta awood dhaqaajisa
2. Kawnkani waxa jirta mar uu bilaabmay.
3. **Gun-gaadh:** madaama oo ay dunidu mar bilaabantay waxa jirta cid bilawday cidaasina waa ilaahay.

Haddii aynu labada hordhac falanqayno waxa ay ina siinayaan in gun-gaadhka u danbeeyaa **yahay inuu jiro ilaahay**. Maadaama oo shay kastaa oo shaqaynayaa leeyahay cid ka shaqaysiisa sidoo kalena dunidu mar bilaabantay halkaasna ay ka dhalanayso cid bilawday. Doodani waxa ay taagnayd wakhtigii ka horreeyay soo shaac bixidii sayniska. Waxana ay doodani burinaysaa lidna ku tahay doodii ka horreysay ee ay qabeen dadkii diidanaa jiritaanka ilaahay kuwaas oo qabay in dunidu tahay wax weligeed soo jiray weligeedna jiridoonto. Waxa ay daliishan jireen in weligeedba cadceedu soo baxaysay weligeedna ay dhacaysay iyada oo iftiinkeedu is naaqusaynin taasina ay caddayn u tahay in weligeedna ay sidaas sii ahan doonto dhimashaduna tahay dhamaad. Waxa dooda nocaasi ah jabiyay mid kamid ah aqoonyahankii islaamka ee **imaamu Qasaal**i waxana uu imaamku dooda noocaasi ah ku jabiyay sida tan waxana uu idhi sheekhu ” shardi maaha in cadceedu iftiinkeeda naaqusto si loo dareemo sii bakhtinteeda ee mar kali ah ayay wada bakhtiyi kartaa”. Maadaama oo

wakhtiga sidaa loo doodayaa aanu jirin saynisku waxa uu waayadii danbe cadeeyay in si Maalinle ah cadceedu u gubto bilyan tanoo helium ah maalinba maalinka ka danbaysana iftiinka cadceedu u uku sii dhawyahay gabaabsi.

Cilmiga casriga ah ee maantu waxa uu sugayaa in dunidu maalin ay bilaabantay ee aysan ahayn wax weligeed soo jiray. waxa uu saynisku xoojiyay mid kamid ah labadii hordhac ee ay doodan nashqadayntu lahayd taas oo ahayd in dunidu mar bilaabantay. Qof kasta oo garaad fayaw lihi waxa ku mudan oo uu aaminsanyahay in wax kasta oo dhaca ay jirto cid ka danbaysaa. Tus: hadii uu qof ka baxo qolkiisa isaga oo miiska u saaranyahay Buug kadibna uu qolkii ku soo laabto isaga oo Buuggii aanu saarnayn miiskii isala markaba waxa uu is weydiinayaa maxaa Buugaygii ka qaaday miiska? Si lamid ah sidan macquul ma ahan in aynu dhahno dunidu iyadaa iska bilaabantahay oo ma jirto cid bilawday ama se nashqadaysay.  Doodan nashqadayntu waa mid adag oo sayniska

maantu sugay labadeeda hordhac. Waxana ay doodani Meesha ka saartay doodii ay qabeen mulxidiintu taas oo ahayd in dunidu weligeed soo jirtay weligeedna jiri doonto.

Markasta oo ay soo baxdo aragti cadaynaysa jiritaanka ilaahay meeshana ka saaraysa dood hore oo ay qabeen kuwa diidan jiritaanka ilaahay waxa ay had iyo goor isku dayaan in ay soo saaraan aragti cusub oo ay mesha kaga saarayaan jiritaanka ilaahay tanina waa mid muujinaysa dabacsanida aaminaada mulxidiinta ee ku aadan jiritaanka ilaahay. Waxyaaba ay had qabeen ee uu saynisku beenimadooda cadeeyay waxa kamid ah in kawnku taaganyahay waxana uu sayniska maantu cadeeyay in kawnku soconayo oo ay sii kala fidayo. Waxa ay sidoo kale wakhti wakhtiyada kamid ah qabeen in dunidu iyadu isa samaysay kadib markii ay yaqiinsadeen in ay dunidu mar bilaabantay. Dooda noocaasi ahna waxa diiday faylasuufyo badan iyada oo lagu naqdiyay garaadka iyo weydiimo ay kamid yihiin dunidu madaama oo

markeedi hore ahayd hal shay oo isku dhagan waayo cida kala qarxisay? Maxaa sababay qaraxeeda? Maxay u qaraxday ee ay iskaga nagana weyday? Iyo weydiimo kale oo badan.

## Dooda nashqadaynta iyo nashqadeeyaha

Doodani waxa ay sidoo kale kamid tahay doodaha ay qabaan dadka aaminsan jiraalka illaahay. Doodani waxa ay ka koobantahay hal-hordhac iyo hal gun-gaadh oo u dhigan sida tan.

1. Nashqad kasta oo jirta waxa ka danbeeya nashqadeeye.

**Gun-gaadh:** nashqada adduunka nashqadeeyaheedu waa illaahay.

Doodani waa dood maangal ah waayo marnaba macquul maahan in uu qofku rumaysto in agabka uu adeegsanayo la yidhaa ma jirto cid samaysay ee iyagaa iska samaysmay doodanina waxa ay lid ku tahay oo ay naqdinaysaa doodii ka horeysay ee ay qabeen mulxidiintu taas oo ahayd in ay dunidu iyadu isa samaysay laakiin

aanay jirin cid samaysay. Balse dhaliilaha kali ah ee ay leeyihiin doodan iyo tii ka horeysay ee aynu soo qaadanay ayaa ah in aysan doodahani cadayn karayn in cida samaysay adduun kani ay tahay ilaah keli ah. waayo doodan nashqadaynta iyo nashqadeeyuhu waxa ay tusaale ahaan u soo qaadanaysa saacada. Haddii aynu isla saacadaa sii daba galno waxa jirta marka la samaynayo saacada waxa loo sameeya si koox ah oo qofba hawl ku leeyahay samaynta saacadaasi. dooda ay keensadeen dadka aaminsan ilaahay ayaa keensanaysa weydiinta noocan ah ee u dhacaysa maxaynu ku cadayn karnaa in dunidan hal ilaah oo keli ahi sameeyay?

Weydiintani waa mid marka hore u muuqata mid aan loo heli Karin wax jawaab ah balse meel yar oo fudud aynu ka eegno si aynu uga jawaabno si ay ku dheehantahay maan-galnimo. Macquul maahan in aynu dhahno aniga oo aadame ahi waxa aan leeyahay dareen shahwadeed maadaama oo aan anigu dareenka noocaasi ah leeyahay ilaahayna dareenkaa wuu

leeyahay sidaan hore u sheegay taasi maaha maan-gal waayo astaamaha ilahay waa qaar isaga oo keli ah gooni u ah. Maadaama oo aynu nidhi astaamaha bani aadamka macquul maaha in uu ilaahayna yeesho waxa soo hoos galaysa astaanta badnaanta. Sida caadiga ah waxyaabaha uu ilaahay abuuray ayuunbaa badata oo noqda hal iyo laba iyo wax ka badanba astaanta badnidana ilaahay malahaan karo waayo haduu yeesho isaga iyo wixii uu abuuray ayaa isku mid noqonaya hadday isku mid noqdaana waxa Meesha ka baxaya awoodii ilaahnimada. Markaa jawaabta weydiintaasi waxa ay noqonaysa in astaanta badnida uu abuurku leeyahay abuuruhuna uusan lahaan Karin.

# Halkuu joogaa ilaahay?

Weydiintani waa weydiin macquul ah marka aan macquul leeyahay waxa aan uga jeedaa in ay tahay wax ku soo dhici kara garaadka aadamaha ah. Midna akhristow ogow marka aynu weydiintan soo gaadhno waxa aynu u noqonaynaa oo aynu hadaladooda dhagaysanaynaa nabiyadii uu ilaahay soo dirsaday maadaama oo ay warkii ilaahay iyagu wadaan.

Marka aynu su`aashan ka jawaabisteeda joogno waxa jira khliaaf u dhaxeeya culimada islaamka waana wax dhici kara in aanad maqlin khilaafkaas. khilaafkani waa mid salka ku haya kala afkaar duwanaanta ay ku kala afkaar duwanyihiin culimadu. aslan khilaafaadku waxa ay ka imaadaan aayadaha iyo axaadiista tafsiirkooda waa halkii ay maah maahdii soomaaliyeed ka ahayd "hadal uu nin si u yidhi nin kalena si u qaaday." Waxa aan uga socdaa

fahanka labadaa marjac ee Diinta loogu laabto ayaa lagu kala duwanyahay oo ninba si u tafsiiranayaa.

Khilaafka culimada ee ku salaysan arrintan ku aadan goobta uu Alle joogo waa khillaaf ah in ay qolo qabto in uu Alle joogo carshiga dushiisa carshigaas oo ka sareeya samooyinka halka qoloda kalena ay leeyihiin goobtu {position} waa mid kamid ah makhluuqaadka Alle in Allena makhluuqaadkiisa lagu tilmaamaa waa qalad weyn. Waxana ay kuwan danbe qabaan in sarraynta uu Alle kitaabkiisa ku tilmaamay sida ku xus ayada ay macnahedu yahay “ intaa kedib waxa uu ka kor maray carshigiisa”.

Waxa jirta aayad kale oo aayatu kursi la yidhaa oo macnaheedu yahay “ kursigiisu waxa uu ku fidsanyahay dhulka iyo samada ” tafsiiro badan ayaa la saaray waxa uu yahay kursigu badi culimaduna waxa ay ku macneeyeen maamul halka hal imam uu kursiga ku macneeyay carshi. Mana jirto sabab loo yidhaa kursigu carshi maaha iyada oo uu qur`aanka Alle marar badan

nafta iyo ruuxda uu adeegsado iyadoo macno ahaan loo jeedo waxa qofka jidhkiisa ku jira.

Ujeedada aan mawduucan u soo qaatay ayaa ahayd in keliya aan isku dayi karo inaan cariyo maskaxda akhristaha si uu doodan uga sal-gaadho si uu u soo helo halka uu ilaahay joogo maadaama oo ay waajib tahay in uu qofku xog rasmi ah ilaahay ka helo.

Imaamu Ash-Shaafici wuxuu yidhi: Caqiidada aan haysto waa isla caqiidadii muslimiintii iga horreysay ay haysteen, taasoo ah shahaadiga iimaanka: "Ma jiro ilaah mudnaan leh in la caabudo Alle mooyee, in Muxammad yahay rasuulkii Eebana waa ka sarreeyaa Carshigiisa, Samooyinkana wuu ka sarreeyaa. Wuxuu ku degaa jannada ugu hoosaysa markuu doono.” [Al-Juyush al-Islaamiyyah, Ibn Al-Qayyim, p. 93] Imaam ibn Khuzaymah oo isna Shaafici ahaa ayaa isna yidhi: “Ruuxii qirta in Eebe ka sarreeyo Carshigiisa. , oo ka sarreeya toddobadiisa Samo,

iyo in laga soocay khalqigiisa, waa Kafir (gaalnimo). Qofkaas waa in lagu amraa inuu toobad keeno oo uu ka fogeeyo caqiidadiisa, haddii kale waa in qoorta laga gooyaa oo lagu tuuraa meel qashinka lagu daadiyo si aysan Ahlul-Qiblah[13] iyo Ahlu-Dhimmah[14] midna uga xanaaqin ur xun oo bakhtigiisa ah. " Abuu Bakar Muxammad At-Tamii, Imaam Shaafici ah oo reer Naisabuur ah, wuxuu yiri: "Kuma tukado gadaashiisa qof ka beeninaya sifooyinkii Alle oo aan aqoonsanayn in Eebbe ka sarreeyo Carshigiisa" [Ibid].

# **Muxuu ALLE inoo abuuray?**

Dabeecadaha Aadamaha waxa kamid ah wax isweydiinta iyada oo ay sabab u tahay garaadka ku lamaan maskaxdiisa. Weydiimaha ay macquulka tahay in ay kusoo dhacaan maskxaha bani aadamka waxa kamid ah weydiimo dhawr ah oo ay kamid yihiin : maxay tahay xikmada noloshu? yaa ina abuuray ? sababma se ayaa la inoo abuuray? xagee ayaynu ka nimid? Xagee se ayaynu kusoconaa? Maxay tahay ujeedada jiritaankeena ka dambaysaa? Iyo su`aalo kale . boggaha soo soccdana waxa aynu kaga faaloon doonaa weydiiinta ah **maxay tahay xaqiiqada noloshu?**

waa arrin isweydiin mudan oo tan iyo bilawgii Bani-aadamka taagnayd taas oo ilaa manta aan loo helin jawaab lagu qanci karo oo la isku raacsanyahay. Badi diimaha jiraana waa qadiyad ay aragti gaar ah ka qabaan taas oo ay ku qabaan qanaaco iyo kalsooni gaar ah. Si aynu aragti guud uga qaadano jawaabaha kala

gedisan ee ay leedahay weydiintani ay isla eegno jawaabaha kala duwan ee ay su`aashani leedahay. Waxa aynu jawaabahooda wada eegi doona dadyaw iskugu jira kuwo rumaysan diimaha kala gedisan sida: Islaamka , Kiristaanka, Yahuudiyada iyo hinduusamka. waxaynu sidoo kale jawaabahooda soo xigan doonaa rag mufakiriin faylasuufyo ah si aynu u eegno aragtida saxan iyo waxa ay ku saxantahay.

Aynu ku horayno aragtiyaha dhanka falsafada ninkan oo loo yaqaano Nicolas Taylor ayaa waxa uu leeyahay sida tan "**Noloshu waa laba mid uun , in noloshu tahay mid aan macno lahayn oo si kediso ah u dhacday dabaqdayna dhamaan xeerarka fiisigiska una shaqaynaysa qaab aanmacno lahayn.{ bilaa macno}** tanina waa mid aanu garaadka saxani qaadan Karin isla isaga ayaana midaas qiraya oo sii wada jawaabtiisa. Waxa uu ina leeyahay markale **"noloshu waxay tahay hawl qorshaysan oo tijaabo ah waxaana qabaa in ay tahay hawl qorshaysan waayo iyadu maaha dhamaadkii.**

**Kawnkan aynu ku noolnahay hadii ujeedada nolosha uu lahaan lahaa waxay noqon lahayd u jeedadaasi mid daaha laga rogo**” .

Ninkani nolosha waxa uu ku tilmaamay in ay tahay mid qorshaysan taas oo macnaheedu noqonayo in uu jiro cid ka danbaysa qorshaynteeda sidoo kalena ay jirto xikmad iyo u jeedo laga leeyahay hawshan. Tanina waa weydiinta aynu jawaabta u raadinayno .sidaa awgeedna ayna macquul ahayn in la ogaado xaqiiqadeeda maadaama oo xaqiiqadeeda keliya ogyahay cidii samaysay adduunkan cidaasina adduunkeenan inagula noolayn.

**Diinta kiristanka ayaa iyadna qabta in xaqiiqada noloshu tahay in la amaano ilaahay maadaama oo uu ina jirsiiyay laguna raaxaysto nolosha.**

Marka aynu raadinayno jawaabta saxda ah ee su`aashan waxa muhiim ah in laba qodob aad maskaxda ku hayso labadan qodob ayaa kala ah.

1. Hadaf : oo ah waxa shayga loo adeegsado tus:- hadafka mobile ka loo adeegsado

ayaa noqon kara in xogo lagu kaydsado loona adeegsado wada xidhiidhka.

2. Arinka labaad ayaa isaguna ah sababta : marka aad rabto inaad hawl qabato waxa jirta hadaf aad hawshaa qabashadeeda ka leedahay sidoo kale waxa jira sabab kugu riixaysa oo aad arrintaa hadafka ka leedahay aad u samaynaysid tus:- hadafka aad mobile ka u isticmaasho ayaa ah inaad dadka kala xidhiidho waa in ay jirtaa sabab cad oo keenaysa baahida ah inaaad dadka la xidhiidho. Baahidaas ayaa noqonaysa sababta kugu riixasa inaad mobile isticmaashid adiga oo yool ka leh. Waxaan aan rajaynayaa in aynu hadeer isfahamnay.

yoolku bani aadamka loo abuuray waa mawduuc sababta loo abuurayna iyaduna waa mawduuc kale oo gooni ah jawaabta aynu raadinaynaana waxa ay taala labadan dhexdooda. Marka aynu aragti qof ama mid diin aragno waa in ay labadan inooga jawaabtaa ama se ku cabirnaa.

Aragtida xaqiiqada nolosha ee ay kiristaanku aaminsanyihiin maaha mid dhamaystiran waayo waxa ka iman kara su`aalo badan oo aan jawaabo loo heli karayn sida: ilaahay baahi miyuu u qabaa in la xuso oo la amaano? Qodobkaas ay qabaan kiristaanku maaha mid la rumaysan karo.

Aragtiyaha kale ee ku aadan xaqiiqooyinka nolosha  idinka Ayaan idiin dhaafayaa inaad taxliilisaan maadaama oo aad hada haysaan laba qodob oo aad u adeegsan kartaan baadhitaankiina iyo ku go`aan qaadashadiina.

Waxa aan markan rabnaa in aynu wada eegno diinteena islamka maadaama oo aynu aaminsanahay in ay tahay mid saxan muhiimna ay tahay in ay su`aashan inooga jawaabto. Waxa jira aayado qur`aan ah oo badan kuwaas oo tilmaamaya hadafka nolosha iyo xaqiiqadeeda aayadahan aynu wada taxliilin doona waxa aayadahan kamid ah :-

**(وما خلقت الجن والإنس إلا ليعبون)**

Tani waa aayada ugu badan ee ay soo qaataan culimadu marka ay ka hadlayaan hadafka loo abuuray insaanka. Aayadan ayaa macnaheedu noqonayaa in aan bani aadamka loo a abuurin waxaan cibaado ahayn mooyaane wax kale. Waxa  macquula in aad isweydiiso intii aan bani aadamka la abuurin waxa jirtay malaa`ig sida uu alle qur`aanka ku xusay in aany caasiyin wuxuu farana yeelaan markaa hadii hadafka loo abuuray bani aadamku yahay cibaado waxa jira duul hore u abuurnaa oo aan ilaahay caasiyaynin ee maxay tahay sababta kale ee loo abuuray bani aadamka? Weli weydiintii wey taagantahay. Hal mid aan ku xasuusiyo in la inoo abuuray cibaado mala odhan karaa waa qayb hadafka kamid ah ee ma wada noqon karto hadafka oo idil? Hadalkan danbe in uu saxan yahay waxa aynu ku cadayn karaa laba mid :

waa mida koobaade ilaahay cibaada waa uu mutaystay maadaama oo uu ina jirsiiyay inaga oo aan jirin waa midan mida uu alle ku mutaystay in aynu caabudno balse u jeedadii uu

jiritaankeena kalahaa  maaha mid la sheegi karo waayo isaga ayuunbaa og. Waa mida kale hadii hadafka insaanka loo abuuray keliya yahay cibaado waxa hore u jiray makhluuqaad kale iyaguna maadaama oo ay noolayaal garaad leh yihiin maxay tahay sababta loo abuuray makhluuqaad ka oo idil? Halkan iyada ah waxa ka baxaya fahanka ah in xikmada ka danbaysa jiritaanka ama se abuurida bani aadamku tahay in ay alle caabudaan waxana uu fahamka noocaasi ahi u noqonayaa inuu yahay qayb hadafka kamid ah balse aanu wada ahayn xikmadii oo idil.


Su`aashani sida saxda ah maaha mid laga jawaabi karo waayo cida keli ah ee jawaabta oo dhamaystiran haysaa waa illaahay keliya jawaabta intii inaga anfacaysay ayaa la inaga siiyay mida muhiimada gaarka ah lihina waa in aynu noolnahay weligeena noolaanayno dhimashaduna ay keliya tahay kala guur laba caalam loo kala  guurayo maadaama oo ay sidaa

tahay waxa aynu hada ku jirnaa yahay imtixaan ciyaari ku lamaan tahay ciyaartan iyo imtixaankanina ay go`aamin doonaan nolosheena danbe iyo qaabka ay u ee kaan doonto.

# Xaqiiqada Aduunka

**Tusaalaha aragtida godka ee plato.**

**(Concept of Plato's allegory cave)**



Mid kamid ah faylasuufyadii reer giriiga ahaa kaasoo noolaa 428 ilaa 348 (BC) dhalashadii nebi ciise ka hor oo lagu magacaabi jiray plato oo ahaa mid kamid ah ardayda socrates ayaa sameeyay sawir tusaale ah kaasoo muujinaya xaqiiqada nolosha aduunyada. Sawirkan tusaalaha ah ee uu sameeyay ayaa ah mid waafaqsan aragtida islamka ee ku aadan nolosha.

Sawirka waalaxaga sare ee qoraalka si fiican usoo ee g kedib qormada kusoo laabo. Sawirka ayaa muujinaya rag maxaabiis ku dhex ah god weyn oo dhulka ka hoos qodan. Waxa jira gidaar weyn oo kala qaybinaya laba qolo oo ah dadka godkan ku dhex jira qolada uu tusaaluhu ku socdaana waa kuwa fadhiya ee daawanaya humaaga ka muuqda gidaarka ka soo horjeeda ee ay samaynayaan dabka weyn iyo raga dabka ka danbeeya.

Haddii godkan weyn gaar ahaan qaybta ay fadhiyaan dadka wax daawanaya haday yihiin dad ay noloshoodu ka dhex bilaabantay godka dhexdiisa waxa keli ah ee ay rumaysanayaan ayaa ah in noloshu gebigeeduba ay tahay godka ay ku dhex jiraan iyo waxa ka dhex socda sidoo kale waxa ay indhahooda ku arkayaan oo ah sawirada ka dhex muuqanaya humaaga uu dabku samaynayo ee dhaq-dhaqaaqa samaynaya aya ula muuqanaya mid dhab ah.

"Nolosha godka ka dhex jirta marka la bar-bar dhigo nolosha dibada waa mid been ah iyada oo

waxa ay indhaheenu qabanayaan gudaha marka lagu jiro ay run u muuqato". Plato.

Haddii mid kamid ah maxaabiistu dibada u baxsado waxa uu arkaya xaqiiqadu waxa ay tahay iyo in noloshu ay ka balaadhantahay waxa godka ka jira, hadii uu maxbuuskaasi soo laabto oo uu u imaado asxaabtii ay godka kuwada jireen waxa uu u sheegaya waxa ay noqonaysa in waxan ay arkayaan uu yahay hadh kaas oo ay samaynayaan rag iyaga ka danbeeyaa iyaga oo adeegsanaya dab balse nolosha dhabta ahi ay taalo godka dibadiisa. Marka uu intaa u sheego asxaabtiisa waxa adkaanaysa in ay rumaystaan oo waxa ay ka keeni doonaan weydiimo badan iyo aaminaad la'aan badan.

Tusaalahani waxa uu cadaynayaa khilaafka ka dhex taagan

" Aaminaada" iyo " Aqoonta " falsafadu sida keli ah ee ay wax ku aaminto ayaa ah in sheyga aqoon dheeraad ah loo yeesho iyada oo sees looga dhigayo cadaymo aan shaki lahayn taas badalkeeda ma qabto in wax la iska aamino ama

se wax la aaminsanyahay jirtaankiisa loo keeni waayo cadaymo sugaya xaqiiqadiisa.

Macnaha sawirkan tusaalaha ah ayaa ah in adduunkan aynu ku noolnahay uu yahay god aad u weyn inaguna aynu ku dhex nahay maxaabiisa waxa aduunkan ka dhex dhacayaana ay yihiin humaagyo aan xaqiiqo ahayn marka loo eego waxa ka dhex jira dunida dabadeeda (xaqiiqada beenta ah) balse inaga inala ah xaqiiqo maadama oo aynu la noolnahay xaqiiqada beenta ah. Waxa keliya ee aadka u adag ayaa ah si aynu u soo eegno waxa aduunkan godka inagu ah dibadiisa yaala in aynu ka baxno balse sida keli ah ee looga baxayaa ay tahay dhimasho aan soo laabad lahayn.

Waxyaabaha ay iska waafaqayaan aragtida nolosha ee islamka iyo midan plato ayaa ah:

1. aduunyadu wey yartahay marka la barbar dhigo caalamka kama danbaysta ah. Godka plato wuu yaryahay marka la barbar dhigo waxa dibada ka ah godka.

2. Waxa jira nolol ka duwan tan aynu hada ku noolnahay ( adduunyo ) sida tusaalaha ka muuqata nolosha godka ka dhex jirta mid ka duwan ayaa dibada godkana ka jirta.

Labadaasi waa qodobada muhiimka ah ee uu plato ka waafaqay aragtida islaamka si guudna tusaalihiisu wuu waafaqsanyahay aragtida islamka.

## Weynu nolaanaynaa weligeen!

Hadalkan marka aad maqasho waxa macquul ah in aad jidh diido oo aad tidhaahdo sidey macquul ku tahay in aynu weligeen noolaan doono? Cutubkan aynu hada ku gudo jirno waxa aynu ku soo qaadanay in aduunyadan aynu hada ku noolnahay ay tahay mid been ah marka loo barbar dhigo xaqiiqada saxda ah ee dibadeeda ka jirta taasna waxa daliil iyo cadayn u ah xadiis qudsigii uu ilaahay ku lahaa aduunyadu agtayda garab kaneeco kama aha. Taasi waxa ay muujinaysaa madaama oo ay kaneecadu sideeda u yartahay marka garab keeda la sii sheegana ay ka sii yaraanayso in noloshani ay tahay wax aan macno badan lahayn.

Sidoo kale waxa aynu soo sheegnay noloshani in ay tahay imtixaan ay ku dheehantahay ciyaar. Charles ayaa laga hayay" noloshan marka aad xaga sare uga baxdo waa qosol wayo waxa is

dhexsaocda malaayiin sheekooyin ah oo aan iskumid ahayn”.

Haddaba akhriste ka muslim ahaan waxa jira mabda`a uu islaamku qabo kaas oo ah in noloshani ay tahay ciyaar ciyaartuna ay jirto wakhti ay dhamaato sidaas awgeed aduunyadan waa laga tagaya qaabka looga tagayaana waa dhimasho halka macnaha dhimashaduna aanu ahayn dhamaad ee uu yahay kala guur loo kala guurayo laba nololood oo aan isku dhawayn.

Laakiin mid ogow labadan nololood gudahooda waad ku dhex noolaanaysaa inta aad kala guurku socdana ee ay xaalada dhimashadu taagantahayna waad noolaanaysaa. Taasi waxa ay ka dhigantahay in aynu inagu weligeen iyo Allaheen noolaan doono.

# Gebo-Gebo

Waxa aynu soo gaadhnay guntii iyo gunaanadkii Buugga, waxa aan rajaynayaa in aad akhriste macluumaad ka koradhsatay dhiganahan ha noqdaan macluumaad aad horey u haysay balse si kale uu Buuggu u dhigay ama se macluumaad gebi ahaanba kugu cusub. Waxa aan sidoo kale rajaynayaa in uu dhiganahan maskaxdaada wax yar oo raad ah kaga tago.

U jeedada aan qalinka ugu qaatay in aan dhiganahan qoro ayaa ahayd in aqoontani afkeena ku qornaato taas oo aan jecelahay aqoonyahanka bulshada inta qarsoon iyo inta muuqataaba in ay qalinka u qaataan si ay usoo min guuriyaan aqoomaha anfaaciga leh ee ku qoran afafka qalaad.

Mawduucyada qaar sida cutubka saddexaad mawduucyada aynu ku soo wada marnay oo idil waa qaar u baahan in uu qofku baadho waayo waxa aan uga tagay dhex keliya waxa aan idin tusinayay doodaha laga qabo iyo sida la iskugu haysto. Dhiganahan kuma jiraan wax aniga afkaartayda ahi waayo waxa aan afkaartayda uga dhawray si aanay dadku ugu kadsoomin madaama oo Buuggu yahay keliya mid aasaas ah.

Ugu danbayntii waxa aan weli ku taaganahay fikirka ah in manta samanka aynu nool nahay ka adagyahay samankii ay awoowyaasheen noolaayeen kuwa inagu awoowo yaal u noqonaana wakhtigooda uu Keenan ka adkaan doono sidaas awgeedna ay muhiim tahay in aynu uga tagno aqoon waa halkii murtidii soomaaliyeed ka ahayd “waari mayside war hakaa hadho” sida saxda ahna u noqonaysa “waari mayside war fiican ha kaa hadho”.

# Allah mahad leh.